QAAYAHAAGA
DOORBIDKAAGA
DOORASHADAADA

Allina Health

(SOMALI)

# SMa Waxay Tahay In Lagu Siiyo Maskax Kicinta Qotoda Dheer?







**For "Should You Have Deep Brain Stimulation" in English, see neuro-ah-78530.**

# Fahmidda Maskax Kicinta Qototada Dheer

## Maskaxdaada iyo Habka Dhexe ee Dareemeyaasha

Unugyada dareemeyaashu (neurons) waxay isgaadhsiin la sameeyaan jidhkaaga iyaga oo diraya oo hela dhanbaalo. Dhanbaaladaasi waxay xukumaan hadalkaaga, dhaqaaqa, habka fikirka iyo dareenka (maqalka, aragga iyo taabashada). Habka dhexe ee dareemeyaashu wuxu ka kooban yahay bilyano ah dareemeyaal ku jira jidhkaaga.

## Dareen Kicinta Maskaxda ee Qotada Dheer

Ciladaha dhaqaaqa (cudurka Parkinson, gariir) waa natiijo ka timid isbeddelo aan caadi ahayn oo ku dhacay unugyada maskaxdaada iyo kiimikooyinka maskaxdaada. Isbeddeladaasi waxay saameyn karaan danbaalada maskaxdaada. Tani waxay saameyn kartaa awooddaada dhaqaaqa.

Cudurka Parkinson waxa sababa lumista dareemeyaasha sameeya walaxda loo yaqaano dopamine. Gariirku waa cilad dhaqaaq oo keenta gariirid daran iyo dhaqaaq aan la xukumin.

Dareen Kicinta Maskaxda ee Qotada Dheer waxay (DBS) waxay isticmaashaa qalab yar oo la yidhaahdo xidhmo baytari (battery pack). Qalabkan waxa lagu rakibayaa laabtaada waxana u diraa danbaalo koronto ah oo sii maraya xadhko la gaadhsiiyay maskaxdaada. Kicintani waxay horjoogsanaysaa danbaalada aan caadi ahayn ee sababa astaamaha ciladda dhaqaaqa qaarkood.

Qaar ka mid ah astaamahaas waxa lagu daweyn karaa DBS:

- gariir
- gaabis
- adkaan.

Astamaaha aan DBS daweyn karin waa:

- asaasaqa
- diiqadda
- calool-istaagga
- dhibaatooyinka hadalka.

Waxa laga yaabaa in bixiyahaaga daryeelka caafimaadku ku taliyo DBS haddii dawadaadu aanay si fiican u xukumi karin astaamahaaga. Waxa laga yaabaa in isticmaalka DBS iyo dawadu ay yareeyaan qaar ka mid ah astaamaha oo ay ku siiyaan xukun dheeri ah oo ad u yeelatid dhaqaaqaaga.

## Isu Diyaarinta

Wada-jir, adiga iyo dhakhtarkaaga dareemeyaasha (neurologist) ayaa go’aamin doona in DBS ay tahay ikhtiyaar fiican iyo in kale.

Haddii ad dooratid in laguu sameeyo DBS, dhakhtarkaaga dareemeyaasha ayaa kuu gudbin doono takhasusle cilad dhaqaaq. Qofkaasi wuxu go’aamin doonaa in DBS ay kuu tahay ikhtiyaar ammaan ah iyo in kale.

Ka-hor hawlgalka, waxad u baahan doontaa in laguu sameeyo:

- sawirka “magnetic resonance imaging” (MRI)
- baadhitaanka fikirka iyo xusuusta (neuropsychological test)
- baadhitaan ah in la ogaado in astaamuhu ay ka jawaabcelinayaan DBS (kaliya cudurka Parkinson).

Haddii ad go’aansatid in laguu sameeyo DBS oo ay kuu tahay ikhtiyaar ammaan ah, waxad u baahan doontaa laba hawlgal:

- hawlgal xadhko lagu xidhiidhinayo maskaxdaada
- hawlgal xidhmada baytariga lagu meeleynayo laabtaada.

# Daweyntaada

## Heerka 1: Hawlgalka Lagu Xidhiidhinayo Xadhkaha

Kani waa hawlgal xadhko lagu xidhiidhinayo maskaxdaada.

Waad soo jeedi doontaa inta lagu jiro hawlgalka. Tani waxay kooxdaada daryeelka caafimaadka ka caawinaysaa in la helo goobaha ugu fiican ee lagu meeleeyo tabiyeyaasha (electrodes).

Waxa laguu sameyn doonaa sawirka MRI ama CT (computed tomography) si loo helo goobta ugu fiican ee lagu meeleeyo tabiyeyaasha.

### Ka-hor hawlgalka

- Raac fariimaha bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ee ku saabsan:
  - cuntista, cabbista iyo isticmaalka tubaakada ama sigaarka
  - qaadashada dawo laguu qoray, dawooyinka la iibsado bilaa waraaqda, dhirta ama walxaha dabiiciga ah iyo fitamiinada.
  - alaabta ad u soo qaadan doontid cisbitaalka.

Ha qaadan dawooyinkaaga cudurka Parkinson ama dawooyinka gariirka 24 saac ka-hor qallitaanka.

### Inta lagu jiro hawlgalka

- Dhakhtarkaagu waxa u haragga madaxaaga ku kabuubyeyn doonaa dawo.
- Waxa laga yaabaa in timaha ku wareegsan aagga qallitaanka la gaabiyo ama la xiiro.
- Dhakhtarkaaga qallitaanku wuxu lafta madaxaaga ka daloolin doonaa 1 god ama ka badan waxana u tabiyeyaasha ku meeleyn doonaa maskaxdaada.

### Ka-dib Hawlgalka

- Waxa laguu sameyn doonaa sawirka MRI ama CT si loo hubsado in tabiyeyaashu ay ku jiraan meel sax ah.
- Waxad habeenkii joogi doontaa cisbitaalka.
- Waxa lagu siin doonaa fariimo ku saabsan:
  - firfircoonida
  - xadeynta sare u qaadista
  - dawo
  - daryeelka jeexitaanka.

# Daweyntaada (oo sii socota)

## Heerka 2: Hawlgalka Lagu Meeleynayo Xidhmada Baytariga

Hawlgalkani waa mid qalabka lagu meeleynayo laabtaada oo xadhkaha lagu xidhiidhinayo tabiyeyaasha.

Waa lagu seexin doonaa inta lagu jiro hawlgalka.
Waxa xidhmada baytariga lagu meeleyn doonaa laabtaada 1 illaa 2 todobaad ka-dib hawlgalka laga qabtay maskaxdaada.

### Ka-hor Hawlgalka

- Waad qaadan kartaa dawadaada cudurka Parkinson ama gariirka maalinta hawlgalka.
- Raac fariimaha bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ee ku saabsan:
  - cuntista, cabbista iyo isticmaalka tubaakada ama sigaarka
  - qaadashada dawo laguu qoray, dawooyinka la iibsado bilaa waraaqda, dhirta ama walxaha dabiiciga ah iyo fitamiinada.
  - alaabta ad u soo qaadan doontid cisbitaalka.
- Aagga ka hooseeya laftaada sakaarka waa la xiiri doonaa, haddii loo baahdo.
- Kalkaaliso ayaa xidid-gal (IV) ka bilaabi doontaa cududdaada.

### Inta lagu jiro hawlgalka

- Dhakhtarkaagu wuxu:
  - jeexitaan (sarniin) ku sameyn doonaa meel wax yar ka hooseysa laftaada sakaarka oo ku meeleyn doonaa qalabka
  - qalabka ku xidhi doonaa xadhkaha lagu rakibay maskaxdaada
  - tijaabin doonaa in qalabku si sax ah u shaqeynayo oo damin doonaa si loo xidho jeexitaanka.

### Ka-dib hawlgalka

- Isla maalintaas guriga ayaad tagaysa oo ka baxaysaa cisbitaalka.
- Waxa lagu siin doonaa fariimo ku saabsan:
  - firfircoonida
  - xadeynta sare u qaadista
  - dawo
  - daryeelka jeexitaanka.
- Waa inad tagtid ballantaada la-sii-socodka ee ad la leedahay dhakhtarkaaga qallitaanka 1 illaa 2 todobaad ka-dib hawlgalka.

## Hagaajinta Barnaamijka DBS

Hagaajinta barnaamijku waxay gargaari doonaa in la go'aamiyo qaddarka kicinta korontada ee sax kugu ah. Takhasuslahaaga ciladda dhaqaaqa ayaa qalabka ku aadin doona barta sax ah isaga oo isticmaalaya fogaan-ka-xukume (remote control).

Hagaajinta barnaamijku waxay bilaabmaysaa 4 todobaad ka-dib hawlgalka laga qabtay maskaxda. Waxad yeelan doontaa qiyaastii 2 illaa 4 booqasho oo ah hagaajinta barnaamijka inta lagu jiro 6-da bilood ee ugu horeeya ka-dib DBS-kaaga.

Waxa laga yaabaa inad u baahatid in laguu sameeyo cilaajka jidhka, xirfadda ama hadalka ka-dib marka ad ka baxdid cisbitaalka. Dhakhtarkaaga dareemeyaasha ayaa kula shaqeyn si loo ogaado waxa adigu kuugu fiican.

# Anfacyada iyo Halisyada

| Anfacyada | Qayb Muhiim ah ka ah Go'aankayga | Fikradahayga |
|---|---|---|
| Waxa laga yaabaa in astaamaha dhaqaaqaaga iyo dhaqaajinta soo fiicnaadaan. Waxa laga yaabaa inu kuu kordho xukunka dhaqaaqa ka-dib la-tacaalista. | ❑ Haa ❑ Maya | |
| Xidhmada baytariga waxa lagu aadin doonaa baahiyahaaga. | ❑ Haa ❑ Maya | |
| Haddii ad qaadatid dawooyin lagu maareynayo astaamahaaga, waxa laga yaabaa in tirada ad qaadanaysid yaraato ka-dib hawlgalka laguu qabtay. | ❑ Haa ❑ Maya | |
| Uma baahan doontid inad sii joogtid cisbitaalka ka-dib marka la meeleeyo xidhmada baytariga. | ❑ Haa ❑ Maya | |
| Hawlgalka dib baa looga noqon karaa mana burburinayo qaybo yaryar oo ah maskaxda. | ❑ Haa ❑ Maya | |

# Anfacyada iyo Halisyada (oo sii socota)

| Halisyo | Qayb Muhiim ah ka ah Go'aankayga | Fikradahayga |
|---|---|---|
| Waxa laguu sameyn doonaa 2 hawlgal gudaha 2 todobaad. Hawlgal kasta wuxu leeyahay halisyo. Bixiyahaaga daryeelka caafimaadka ayaa kuwaas kuu sharixi ama kuu sheegi doona. | ❑ Haa ❑ Maya | |
| Saameynada ama dhibka ka imanaya waxa ka mid noqon kara madax-xanuun, caabuq, faalig, dhiigbax, suuxid, xanuun muddo gaaban iyo dawakh ka-dib qallitaanka. | ❑ Haa ❑ Maya | |
| Waxa laga yaabaa wali inad lahaatid qaar ka mid ah astaamaha cudurka Parkinson ama gariir. | ❑ Haa ❑ Maya | |
| In ka yar 1 marka la fiiriyo 10-kii qof ayaa dhib ku arki doona qalabkooda, sida rifan qalab. | ❑ Haa ❑ Maya | |

# Doorbidkayga

| Su'aalo | Fikradahayga |
|---|---|
| Marka ad ka fikirtid halisyada suurtogalka ah, waa maxay cabsiyadaadu ama walaacyadaadu? | |
| Marka ad ka fikirtid DBS, maxay yihiin rajooyinkaagu ama hadafyadaadu? | |
| Maxaa kuugu muhiimsan? | |
| Ma kuu cad yihiin anfacyada iyo halisyada DBS? | |
| Ma jiraa wax laga yaabo inu kaa hor istaago inad tan sameysid? | |

**Go'aankaygu Wakhtigan Waa**

❑ In la ii sameeyo hawlgalka ❑ In aan la ii sameyn hawlgalka

# Tallaabooyinka ku Xiga

## Su'aalo Ad Weydiisid Bixiyahaaga Daryeelka Caafimaadka

1. Hawlgalka DBS ma ii yahay ammaan?

2. Maxay yihiin halisyadaydu ka-dib qallitaanka?

3. Goorma ayaan ku fikiraa bilaabista DBS?

4. Sidee bay dhif ama caam u yihiin halisyada DBS?

5. Intee buu leeg yahay suurtogalka inan ka faa'iideysto DBS?

6. Marka laga tago DBS, maxaan sameyn karaa si loo hubiyo oo looga hortago in astaamaha ciladdayda dhaqaaqu ka sii daraan?

7. Goorma ayaan u baahanahay inan go'aansado in la ii qabto hawlgaladan?

8. Waa maxay talaabada iigu xigta?

9. Su'aalo kale: ______________________________

# Tallaabooyinka ku Xiga

## Su’aalo Ad Weydiisid Bixiyahaaga Caymiska

Waa muhiim inad fahamtid anfacyadaada daryeelka caafimaadka marka ad sameynaysid go’aanka la-tacaalista ama daweynta.

Wac bixiyahaaga caymiska oo soo si sax ah u soo ogow waxa la dabbiro iyo waxa aan la dabbirin ee hoos yimaada qorshahaaga, iyo inta lagaa rabo inad adigu iska bixisid. Lambarka teleefonka ka fiiri kaadhkaaga xubinnimada.

1. Qallitaanka DBS ma yahay mid la dabbiro ama la iga bixinayo kharashkiisa?

2. Ma jiraan wax ah shuruudo ama qodobo gaar ah oo an u baahanahay inan ka soo baxo si an u helo dabbiraad ama ka bixin kharash?

3. Waa kuwee bixiyeyaasha daryeel caafimaad ee ku jira shabakadda?

4. Imiisa ayaa la iga rabaa inan ka bixiyo la-tacaalistan?

5. Haddii an u baahdo qallitaan, intee in leeg ayaa la iga rabaa inan ka bixiyo hawlgalka?

6. Su’aalo iyo xusuus-qor kale: ______________________________

________________________________________________________

allinahealth.org

© 2017 ALLINA HEALTH SYSTEM. TM – A TRADEMARK OF ALLINA HEALTH SYSTEM
OTHER TRADEMARKS USED ARE OWNED BY THEIR RESPECTIVE OWNERS
THIS DECISION AID DOES NOT REPLACE MEDICAL OR PROFESSIONAL ADVICE; IT IS ONLY A GUIDE.
neuro-somali-ah-78598 (8/18)